# Waxyaabaha la fisho kadib tallaalada

NHS

**Buug-yarahaan wuxuu wax kaaga sheegayaa waxyeelooyinka gaarka ah ee tallaalada kuwaas oo laga yaabo inay ku dhacaan dhallaanka iyo carruurta yaryar ee jira illaa shan sano.**

Tallaalka ka dib, ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu ooyo wakhti yar, laakiin sida caadiga ah arrintaas waxaa ay ku baaba'daa sida ugu dhakhsaha badan adigoo ilmaha laabta gelinaya ama raashiin siiyaa. Carruurta intooda badani ma laha wax jawaab celin kale ah.

## Jawaab celinta goobta cirbadda lagu durey.

Carruurta qaarkood waxay yeeshaan barar, casaan ama buro yar oo adag oo ah meesha laga duray oo laga yaabo inay xanuun tahay marka la taabto. Tani waxay caadi ahaan socotaa 2 ilaa 3 maalmood mana u baahna wax daaweyn ah.

## Qandho

Qandhadu waa heerkul ka sarreeya 38°C. Qandhada ayaa sida caadiga ah ku badan carruurta yaryar, laakiin inta badan waa mid khafiif ah. Haddii kuleyl laga dareemo wejiga ilmahaaga marka la taabto oo ay u muuqdo casaan, isaga ama iyadu waxaa laga yaabaa inay xuman hayso. Waxaad hubin kartaa heerkulkooda adigoo isticmaalaya heerkulbeeg.

| Haddii ilmahaagu uu qabo qandho: |
| --- |
| **Ha gelinin** barkada qubeyska |
| **Dhar qooyan** ha saarin |
| **Ha ku dul shidin** marwaaxad |

## Kaddib marka laga tallaalo MenB

Waxa uu yaalanayan karaa xumad kadib tallaalka kasta, laakiin waxaa ay aad u badan tahay marka tallaalka MenB lala bixiyo tallaalada kale ee caadiga ah marka uu ilmuhu jiro laba bilood iyo afar bilood. Xumadu waxay muujinaysaa in jidhka ilmaha uu ka jawaab-celinayo tallaalka, inkastoo haddii aan xumad jirin aanay ahayn in tallaalku uusan wax tarin. Heerka qandhadu waxaa ay ku xiran tahay cunuga oo heerka qandhadu calaamad uma aha sida fiican ee tallaalku u shaqeeyey. Siinta daawada paracetamolka waxay hoos u dhigi doontaa halista qandhada, cuncunka iyo raaxo la'aanta guud (oo uu ku jiro xanuunka meesha laga durey) tallaalka ka dib.

Ka dib mid kasta oo ka mid ah tallaalada labada-bilood iyo afarta bilood ah waxaad ubaahnaan doontaa inaad ilmahaaga siiso saddex qiyaas oo paracetamol ah (2.5ml oo ah paracetamolka dhallaanka 120mg / 5ml oo milan ah) si looga hortago oo loo daaweeyo qandho kasta oo ka imaan karta. Waa inaad siisaa qiyaasta koowaad ee paracetamolka sida ugu dhakhsaha badan ka dib booqashadaada tallaalka labada-bilood ah. Markaa ka dib waa inaad siisaa qiyaasta labaad, afar ilaa lix saacadood ka dib, qiyaasta seddexaadna waxaa siisaa afar ilaa lix saacadood ka dib qiyaasta labaad. Waxaad ubaahan doontaa inaad raacdo tallaabooyin la mid ah kaddib tallaalada la siiyo marka uu ilmuhu afar bilood jir yahay. Kalkaalisadaada ayaa ku siin doonta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daawada paracetamolka xilliga ballantaada

**Haddii aadan haysanin sharoobo paracetamol ah oo loogu talagalay carruurta yaryar ee jooga guriga waa inaad inyer heshaa wakhtiga booqashada ugu horreysa ee tallaalka. Waxaa laga helaa farmasiyada iyo dukaamada.**

talaalka, waxaana laga yaabaa in lagu siiyo buug-yare ka kooban talooyin qoraal ah.

## Kaddib tallaalka MMR

MMR wuxuu ka kooban yahay saddex tallaal oo kala duwan (jadeeco, qaamo-qashiir iyo jadeeco-jarmal), duritaanka kadib kuwani waxaa ay xilliyo kala duwani sababi karaan falcelino.

Ka dib lix ilaa toban maalmood, tallaalka jadeecadu wuxuu bilaabmaa inuu shaqeeyo wuxuuna sababi karaa qandho, finan u eeg kuwa jadeecada, iyo rabitaanka cunnida oo lunta. Shakhsiyaadka leh calaamadaha tallaalka la xiriirta ma u gudbin karaan dadka kale.

Laba ama saddex toddobaad kadib duritaanka, tallaalka qaamo-qashiirku wuxuu carruurta qaarkood u keeni karaa calaamadaha qaamo-qashiirka (qandho iyo qanjidhada oo barara).

Tallaalka jadeeco-jarmalka wuxuu keeni karaa finan yar iyo heerkulka oo laga yaabo inuu xoogaa kor u kaco, inta badan qiyaastii 12 ilaa 14 maalmood ka dib duritaanka, laakiin finanka ayaa sidoo kale laga yaabaa inay soo muuqdaan ilaa lix toddobaad kadib.

Haddii aad ka welwelsan tahay cunugaada, ku kalsoonow dareenkaaga. La hadal dhakhtarkaaga ama NHS ka wac **111**.

U waco dhaqtar si dhakhso leh haddii, wakhtigey doontaba ha noqotee, ilmahaagu yeesho heerkul ah 39-40 ° C ama ka sareeya, ama uu gaaro meesha ugu dambeysa.

**Xusuusnow, weligaa ha siinin daawooyin ay ku jiraan aspirin carruurta ka yar 16 jir.**

Haddii goobta caafimaadka ay xiran tahay oo aanad awoodin inaad la xiriirto dhakhtarkaaga, ku kalsoonow dareenkaaga oo aad isbitaalka kuugu dhow oo leh qaybta gargaarka deg dega ah.

Ka dib markaad akhriso buug-yerahan, haddii aad weli ku faraxsaneyn falcelinta ilmahaaga ee tallaal kasta, la hadal kalkaaliyahaaga caafimaad ama Dhakhtarkaaga guud.

## Hubinta badbaadada tallaalka

Ka hor intaan tallaalada suuq la soo gelinin, waa inay ruqsad ka helaan Hay'adda Xakameynta Alaabaha Caafimaadka taas oo qiimeyn ku sameysa bedbaadadooda iyo waxtarkooda.

Marka lagu soo daro barnaamijka , badbaadadooda ayaa si joogta ah loola soconayaa si markaa saameynahooda gaarka ah ee cusub loo ogaado loona baaro si dhakhso ah.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan badbaadada tallaalka booqo www.mhra.gov.uk

## Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saameynaha gaarka ah ee tallaalada iyo tallaalida, xarunta caafimaad ka soo qaado buug-yeraha *Tilmaamaha talaalka illaa da'da 13 bilood jirka ah* ama qaliinka ama aad NHS Choices www.nhs.uk.

© Crown copyright 2018. 2748337 2p AUG 2018

NHS